

Renting in Seattle

KAGUURIDA GURIGGA

Waxaa jiro macluumaad badan oo aad ubaahantahay inaad ogaato markaad gurigga kaguurayso. Buuggaan macluumaadku kahadlayaa waxa aad samaynayso markaad rabto inaad kaguurto gurigga ama marka mulkiilaha gurigagu kuukeeno ogaysiiska ah inaad guriga iskaga guurto. Wuxuu sidoo kale kahadlayaa soocelinta lacagta damaanada lagaaga qaatay, galitaanka mulkiilaha iyo nidaamka guri kabixinta.

Booqo www.seattle.gov/rentinginseattle ama wac **Renting in Seattle Helpline (Laynka gurmada ee Renting in Seattle)** adoo kawacaya **(206) 684-5700**.



City of Seattle
Somali

Markaad Rabto inaad Guurto

- Haddii aad guriga kudaganayd kiro bile ah, waa inaad keentaa ogaysiiska qoran ugu yaraan 20 maalmood kahor intaysan dhamaan bisha aad guurayso aadna ukeentaa mulkiilaha guriga.
- Haddii aad haysato heshiis kiro oo xili gaar ah ku eg, tixraac heshiiska kirada si aad u aragto shuruudaha ogaysiiska.
- Haddii aad kufashilanto soogudbinta ogaysiis saxan waxay kugu qasbaysaa inaad qaado masuuliyada bixinta qarashka kirada ee bisha xigta.
- Inaad kabaxdo heshiiska kirada ayuu kuu ogolyahay sharcigu marar aad dhif u ah iyo xaalado gaar ah. Haddii ay qasab tahay inaad heshiiska kirada kahor intaysan mudadeedu dhamaan, iskuday inaad wadahal burinta heshiiska kirada kalagasho mulkiilaha guriga raadsana talo sharci haddii aad ubaahato.



Haye?
Mulkiilaha
gurigayga ayaa
isiiyay ogaysiis...



Marka mulkiilaha gurigaagu rabo inaad Guurto

Haddii aad haysato heshiiska kirada, akhri qaybta sida heshiiska kirada kudhamaado. Haddii ay kudhamaato taariikh gaar ah, aysan kusiinayn dookh aad kirada kucusboonaysan karto aysana lahayn heshiiska bil iyo barkeeda ah, waa inaad guriga uga guurtaa sida ku cad heshiiska kirada.

- Haddii aad guriga kukiraysay qaab bile ah, mulkiilaha gurigu waa inuu haystaa *sabab cad* si uu uburiyo heshiiskaaga kirada. Ogaysiis qoran waa inuu sheegaa sababta cad si qeexan uuna baxiyaa mudada sharciga ah ee bixinta ogaysiiska si aad guriga uga guurto. Waxaa jiro 18 sababood oo guriga lagaaga rari karo kuwaasoo aad kahelayso barta www.seattle.gov/rentinginseattle.
- Qaar kamid ah sababaha guriga lagaaga rari karo ayaa ubaahan in mulkiiluhu kusiiyo meel kale oo aad uguurto.
- Haddii aad ogaysiis kahesho mulkiilaha guriga oo uu kaaga dalbanaayo inaad guurto, wac Renting in Seattle Helpline si ay ufiirshaan inay tahay ogaysiis sax ah taasoo buuxinaysa dhamaan shuruudaha sharciga.


Xaalada Kaguurida guriga

- Sharciga ayaa kaadoonaaya inaad guriga kadhigto siduu ahaa markaad soodagtay marka laga reebo murmuruxyada ama xogxoga caadiga ah.
- Mulkiilaha gurigaagu waa inuu kusiiyaa liiska xaaldaha guriga markaad soogalaysa gurigga aad heshiiska kugashay waana inuu liiskaas raaca markuu hubinaayo inaad wax kahalaysay gurigga.
- Haddii ay jiraan waxyeelooyin, mulkiilahaagu waa inuu kabaaraan dagaa xiliga iyo xaalada shay waxyeeladu gaartay kaamana qaadi karo wax kabadan qarashkeeda caadiga ah.
- Socod aad guriga kusoo wareegto adoo lasocda mulkiilaha guriga ayaa ah qaab badanaa lagu hubiyo guriga laakiin maaha wax sharcigu doonaayo. Kataxadar inaad qorto xaalada gurigaaga kahor intaadan celin furaha. Sawirada iyo muqaalka ayaa kucaawin kara haddii muran kajiro soocelinta carbuuntaada.

	Xaaladaha jira xiliga Soogalida	Xaaladaha jira xiliga Bixitaanka
Xooga	✓ Caadi xaalad - dhawr cifadood/jajab	✓ Iskumid
Daahyada	✓ Xaalad fiican	✗ Waxyaabaha ay halaysay biisadu
Qaanadaha	✓ 1" calaamad gubasho ah oo kamuuqata siinka	✓ Iskumid
Riinjiga	✓ Riinjigeenta Dhawaan lasameeyay	✗ Riinjiga aan faxaqiijin ee qolka jiifka

Soocelinta Carbuunta damaanada

- 21 maalmood gudahood laga bilaabo marka heshiiska kiradu dhamaado, mulkiilaha gurigu waa inuu kuusoo ceshaa lacagtaadii carbuunta ahayd ama uu kusiiyaa bayaan buuxa oo kaas ah, sababta qayb kamid ah lacagta carbuunta ah lagaaga reebay.
- Laxariir Laynka gurmada ee Renting in Seattle hadaan mulkiilaha gurigaagu uusan raacin shardiga mudada 21 malmood ee soocelinta carbuunta ah.
- Khilaafaadka kajira waxyeelada iyo dilaaca iyo xogxoga, qarashka dayactirka iyo biilalka aan ladihibin, waxaa qasab ah in lagu xaliyo wadahal ayadoo lamaraayo Dispute Resolution Center of King County (Xarunta Xalinta Khilfaadka ee Degmada King), www.kcdrc.org ama maxkamada cabashooyinka yaryar, www.kingcounty.gov/courts/district-court/small-claims.aspx.



Helitaanka Mulkiilaha gurigaaga

- Mulkiilaha guriga ayaa xaq uleh inuu guriga tuso dadka kale ee kiraystayaasha ah, shaqaalaha ama iibsadayaasha asagoo kusoo ogaysiinaaya 1 maalin kahor.
- Soogalitaanka muhiimka ah ama lagu heshiyay ee dayactirada ayaa ubaahan 2 maalin kahor inuu kuusoosheego.
- Waxaad udiidi kartaa inuu gurigaaga soogalo haddii aad haysato sabab rasmi ah sida inuu khilaafay jadwalka kudagsan laakiin waa inaad xaqiijisaa inaad siiso xiliyo kale ood firaaqo leedahay.
- Sharciga labadiinuba adigga iyo mulkiilaha gurigaad dagantahay waa inaad qaab macquul ah uwaajahdaan galitaanka mulkiilaha ee gurigaaga.



Kasaarida Gurigga

Mulkiilaha gurigga waa inuu kasoo qaataa *Writ of Restitution* (Amarka Guri kasaarida) maxkamad sare si uu gurigga ugasaaro kirayste.

Hawsha ayaa kubilaabmayssa ogaysiis lagu siiyo si ad xeerka uraacdo ama gurigga uga guurto. Haddii kiraystuhu kufashilmo xalinta arinta kahor intaan ogaysiisku dhicin, mulkiilaha guriga ayaa dacwada 'qof sharci daro kudagan' ugudbin kara maxkamada kana gudbinaaya kiraystaha dacwad iyo cabasho. Kiraystuhu waa inuu dacwada uga jawaabaa mudada kuqoran ama wuxuu waajahayaa xukun asaga kadhan ah. Xaakimka ayaa si kama danbays ah ugoaminaaya natiijada kuqoran *muujinta kiiska* dhagaysiga.

Waa muhiim inaad caawimaad sharci hesho islamarkaba hadii mulkiilahaagu kuusoodiro ogaysiis iskuna day inaad kafogaato in gurigga lagaa saaro ilaa intaad awoodo. In diiwaanka lagu gasho in guri lagaasoo cayrshay wuxuu kugu adkayn karaa inaad mustaqbalka guri kiro ah hesho wuxuuna sidoo kale dhibaatayn karaa sumcadaada.

Wac Renting in Seattle Helpline si aad uhesho macluumaad dheeri ah.



City of Seattle

Seattle.gov/rentinginseattle

Laynka gurmada (206) 684-5700



Magalaada Seattle waxay aaminsantahay iskudhafnaanta iyo sinaanta dadka. Dadka soogalootiga ah iyo qaxootiyaasha waa lagusoo dhawaynayaa magaalada. Shaqaalaha magaaladu dadka mawaydiiyaan sharcigooda muwaadinimada waxayna ushaqeeyaan dhamaan dadka dagan magaalada ayadoon loofiirnayn inay soogalooti yihiin iyo inkale.

Haddii aad tahay qof naafo ah aadna doonayso inaan macluumaad kugu siino qaab kale fadlan soowac laynkeena gurmada. Laynkeena TTY (Dadka Dhagaha La') waa (206) 233-7156.

Adeegyada turjumaanka ayaa markasta diyaar ah. Dukumiintigaan waxaad kuhelaysaa luuqadaha:

English • Español • Oromiffa • af-Soomaali • አማርኛ • ཀ་ས་ལྷོ་མ་ • 中文 • 한국어 • ພາສາລາວ
русский язык • ภาษาไทย • ភាសាខ្មែរ • Tiếng Việt

